

Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta

Talada loogu talagalay Waaldiiinta iyo Daryeeleyaasha.

Isticmaalka Shayada si aad Ilmahaaga uga Caawiso in ay Fahmaan Caadiyada.

Maxaa shayada loogu isticmaalayaa caadiyada ama hawlaha caadiga ah?

Shayada loogu talagalay caadiyadu waxay carruurta ka caawiyaan in ay:

- Fahmaan caadigooda maalin walba
- Hal caadi u dhaafaan caadiga xiga
- Ogaadaan waxa marka xiga uga imanaya maalintooda.

Waa kuwan tusaalooyinka shayada aad isticmaali karto si aad u matasho caadiga ama hawsha caadiga ah:

- Koob loogu talagalay waqtiga wax la cabbo
- Tuwaal ama shukumaan loogu talagalay waqtiga qubaysiga
- Buug loogu talagalay waqtiga sheekada
- Gaari lagu ciyaaro oo loogu talagalay waqtiga ciyaarta
- Malqaacad ama qaaddo loogu talagalay waqtiga cuntada
- Koodh ama jaakad loogu talagalay dibad u baxa
- Caday loogu talagalay waqtiga hurdada.

Sida shayada loogu isticmaalo caadiyada ama hawlaha caadiga ah:

1. Ilmaha isku soo jeedi adigoo hoos ugu degaya heerka araggooda. Ka dibna magacooda sheeg, ama aayar u taabo gacantooda
2. Shayga tus ka hor dhacdada xigta oo sheeg waxa dhici doona, matalan "waqtiga cuntada" ama "waqtiga hurdada"
3. Islamarkaaba ilmaha u qaad dhacdada si aad iyaga uga caawiso in ay isku xiraan shayga iyo waxqabadka
4. Ilmaha u oggolow in ay shayga hayaan inta ay u guurayaan dhacdada
5. Hubi in dhacdadu ay diyaar tahay ka hor inta aadan isticmaalin shayga la eegto si aad ugu wareejiso, tusaale ahaan haddii ay tahay waqtiga la baxayo hubi in aad haysataan wax walboo aad u baahan tihiin ka hor inta aydaan bixin.

Fikradaha ku saabsan isticmaalka shayada:

- Ilmaha ayaa laga yaabaa in aanay rabin in ay shayga hayaan waqtiga ay dhaqaaqayaan, taasina dhib ma leh! Hubi in ay adiga kuu soo jeedaan, oo ay shayga arki karaan dhacdada ka hor.

- Dooro shayo ku toosan dhacdo kaste, matalan, xafaayad loogu talagalay waqtiga loo beddelo.
- Hubi in ay dhacdadu diyaar tahay ka hor inta aadan shayga isticmaalin, matalan, wax walba diyaari ka hor inta aydaan dibadda u bixin.